**DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

# Xeer-nidaamiyaha 3aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# Xaq-u-lahaanshaha Lacag-siinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**Tusmo**

***1. Hordhac*** ........ ***1***
1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda ........ 1
1.2. Mabaa'diida Hagaya ........ 1
1.3. Waxa lagu maamulayo ........ 1
1.4. Erey-bixinta ........ 2
1.5. Saacadaha shaqada ........ 3
***2. Diiwaannada Imaanshaha Shaqada*** ........ ***4***
2.1. Waajibnimada Diiwaangelinta Imaanshaha Shaqada ........ 4
2.2. Waraaqaha Imaanshaha Shaqada ........ 4
2.3. Shaqaalaha shaqeeya wax ka yar saacadihii shaqada ee laga rabey ........ 5
2.4. Soo-daahidda ........ 5
2.5. Ka-maqnaanshaha Shaqada ........ 5
2.6. Baxsad (*Abscondment)* ........ 6
2.7. Shaqada ka baxsan saacadaha shaqada ee caadiga ah ........ 6
***3. Ansaxinta Waraaqaha Imaanshaha Shaqada*** ........ ***6***
***4. Mushaarka*** ........ ***7***
***5. Cabashooyinka iyo Rafcaannada*** ........ ***7***
***6. Ansaxinta Xeer-nidaamyaha*** ........ ***8***

# 1. Hordhac

## 1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 31aad, Faqradda 31.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 waxaana sida ay sheegayso faqradda 1.4.1(f) marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka

1.1.3. Xeer-nidaamiyahan waxaa uu sameynayaa habraacyada ay tahay in ay raacaan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Hay'adda Loo Shaqeey si ay u hubiyaan in Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ay lacagaha ay xaq u leeyihiin ay ka helaan Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

## 1.2. Mabaa'diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga iyo ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka.

1.2.2. Dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waa in xaqooda uu buuxa waqtigii la rabey loo siiyaa si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

1.2.3. Dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waa in ay ka go'naataa in ay waajibaadyadooda iyo mas'uuliyahooda uga soo baxaan si waafaqsan tilmaanta qoran ee shaqadooda iyo mabaa'diida, xeer-nidaamiyeyaasha, siyaasadaha iyo habraacyada lagu maamulo shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

1.2.4. Dhammaan shaqaalaha doorkoodu yahay maamul iyo maareyn waxaa saaran mas'uuliyad ah in ay si wax-soo-saar leh u maareeyaan shaqaalahooda, taas oo ay ka mid tahay imaanshaha shaqada.

## 1.3. Waxa lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo waxa xagga hoose lagu cayimey, xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa lacag-siinta dhammaan shaqaalaha maamulka iyo maareynta ee Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya ee Dowlad-goboleedka Jubbaland oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan.

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixinayaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidanka booliska, ciidamada amniga, iyo ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la soo doorto
d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha
e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi
f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo.

1.4. Erey-bixinta

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, ereyadan waxaa ay yeelanayaan macnaha soo socda;

a) ***"Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo

b) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

c) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

d) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

e) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

f) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

g) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

h) ***Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

i) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

j) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

k) ***"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

l) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

m) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka**.**

<u>Imaanshaha shaqada</u>

1.5. <u>Saacadaha shaqada</u>

1.5.1. Saacadaha shaqada waxaa ay ku xiran yihiin baahida Dowladda ee la xiriirta joogteynta adeeg-bixinta.

1.5.2. Saacadaha shaqada ee caadiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waa **36 saacadood** toddobaadkii oo lix maalmood la shaqeeyo, Sabti ilaa Khamiis, 8:00 subaxnimo – 12:00 duhurnimo iyo 1:00 – 3:00 galabnimo, oo uu ku jiro waqti loogu talogaley qado iyo salaad kaas ah inta u dhaxaysa 12:00 – 1:00 duhurnimo.

1.5.3. Saacadaha shaqada ee caadiga ah waxaa wax ka beddeli kara Madaxa Waaxda ee Hay'ad Loo Shaqeeyo haddii ay lagamamaarmaan u tahay gudashada waajibaadyada hay'adda.

1.5.4. Waqtiyada qaar mararka ay jiraan arrimo diimeed ama kuwo dhaqan ayaa waxaa saacadaha shaqada wax ka beddeli kara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo la tashanaya Golaha Wasiirradaisaga oo soo saaraya Tilmaan/Amar.

1.5.5. Waqtiga qadada ayaa Madaxda Waaxaha waxaa ay ka sameyn karaan jadwal hubinaya in adeegga macaamiishu uusan kala go'in ama aaney dhicin in meelaha adeegga lagu bixiyo laga wada maqnaado.

1.5.6. Si wax looga qabto baahiyaha Dowladda, ayaa Jimcayaasha qaar waxaa maalin shaqo ka dhigi kara Madaxa Waaxda, marka ay jiraan xaalado aan caadi ahayn. Marka qof shaqaalaha lagu waajibiyo in uu shaqeeyo maalin Jimce ah, qofkaa shaqaalaha ah waxaa uu xaq u leeyahay in uu helo waqti

fasax ah oo loogu beddelo kii uu shaqeeyey sida uu dhigayo Xeer-nidaamiyaha 7aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Fasaxyada Xaqa Loo Leeyahay

1.5.7. Qofka shaqaalaha ah waa in uusan ka maqnaan shaqada isaga oo aan oggolaansho hore haysan in uu sabab caqligal ah uu keeno ma ahee.

1.5.8. Haddii qof shaqaale ah uu shaqada u imaan waayo sida laga rabo, ama sababo dhab ah daraaddood uu shaqada ka soo daaho, waa in uu soo waco maareyihiisa/heeda ugu dambeyn **9.30 Subaxnimo** waana in uuna la socodsiiyo xaaladda jirta.

# 2. Diiwaannada Imaanshaha Shaqada

2.1. Waajibnimada Diiwaangelinta Imaanshaha Shaqada

2.1.1. Sida uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, Qodobka 20aad, Faqradda 20.2:

a) Diiwaanada imaanshaha shaqada ayaa ay toddobaadle u diyaarinayaan una soo gudbinayaan dhammaan shaqaalaha heerkooda ka hooseeyo **Agaasime Guud**.

b) Mushaaraadka waxaa la bixinayaa keliya haddii uu jiro diiwaan lagu qanco oo tilmaamaya imaanshaha shaqada ee bishaa.

2.2. Waraaqaha Imaanshaha Shaqada

2.2.1. Dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda ee heerkoodu ka soo hooseeyo **Agaasime Guud** waa in ay buuxiyaan **Waraaqda Imaanshaha Shaqada ee Billaha ah** ee la socota Tilmaanta/Amarka C ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

2.2.2. Waraaqaha imaanshaha shaqada waa in ay ku jiraan macluumaadka soo socda:

a) Magaca qofka shaqaalaha ah
b) Jagada/magaca shaqada
c) Waaxda/Qaybta
d) Lambarka Aqoonsiga
e) Bisha waraaqda imaanshaha shaqada ay la xiriirto
f) Saacadda uu soo galey shaqada iyo saacadda uu ka baxay shaqada maalin kasta oo ay ka mid tahay xilliga qadada iyo wadarta saacadaha uu shaqeeyey maalin kasta
g) Faallo kale oo arrinta u habboon oo ay ka mid tahay soo-daahid, fasax caafimaad, fasax-sanadeed, fasax uusan lacag qaadan, waqti uu shaqada ka nasto oo loogu beddeley waqti kale oo uu shaqeeyey sida uu dhigayo Xeer-nidaamiyaha 7aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Fasaxyada Xaqa Loo Leeyahay
h) Saxiixa qofka shaqaalaha ah
i) Ansaxinta maareeyaha qofka shaqaalaha ah.

2.2.3. Shgaqaalaha lagu helo in ay been-abuurayaan diiwaannada imaanshaha shaqada waxaa laga qaadayaa tallaabo anshax-marin ah oo waafaqsan

Xeer-nidaamiyaha 5aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Anshaxa iyo Wax-ka-qabashada Anshax-xumada.

2.3. Shaqaalaha shaqeeya wax ka yar saacadihii shaqada ee laga rabey

2.3.1. Shaqaalaha shaqeeya wax ka yar saacadihii shaqada ee laga rabey maalin kasta waxaa lagu waajibin karaa, ama waxaa ay dooran karaan in, waqtigii ay maqnaayeen soo magaan isla maalintaa ama maalin kale, waa in ay arrintan ku qoraan waraaqda imaanshaha shaqada ee ay diyaarinayaan.

2.3.2. Shaqaalaha shaqeeya wax ka yar **36da saacadood** ee looga baahnaa toddobaadkii si ay u helaan mushaar bille ah oo lagula heshiiyey waxaa mushaarkooda bisha wax looga jarayaa si waafaqsan Faqradda 3.3.3 ee Xeer-nidaamiyahan.

2.3.3. Mushaar-bileedka la siiyo qofka shaqaalaha ah waxaa lagu xisaabinayaa wadarta saacadaha uu bil kasta shaqeeyey inta ay boqolkiiba ka tahay wadarta saacadaha looga baahnaa in uu ka shaqeeyo bisha oo lagu dhuftey mushaar-bileedka sida lagu sharxay tusaalahan hoose:

**Tusaale**

Saacadaha ay ahayd in uu ka shaqeeyo bisha x 6 saacadood (tusaal 24x6 =144)

Saacadaha uu dhab ahaan shaqeeyey sida ay tilmaameyso waraaqda waqtiyada uu shaqeeyey (tusaale ahaan 140)

Saacadaha uu dhab ahaan shaqeeyey boqolleyda ay ka yihiin saacadaha laga rabey in uu shaqeeyo (tusaale ahaan 97%)

Lacagta la siinayo waa lacagta caadi ahaan mushaarku yahay oo lagu dhuftey boqolleyda ay saacadaha uu shaqeeyey ay ka tahay saacadaha ay ahayd in uu shaqeeyo

Tusaale – Mushaarka caadiga ah 500.Mushaarka la waafajiyey saacadaha la shaqeeyey = 485

2.4. Soo-daahidda

2.4.1. Qofka shaqaalaha ah ee shaqada ka soo daahaya wax ka badan 15 daqiiqo ka dib waqtigii caadi ahaan ay shaqadu bilaabaneysey waa in uu ku soo wargeliyaa maareeyaha uu tooska u hoos tago. Qofka shaqaalaha ah waa in uu sababta uu u soo daahay ku qoraa Waraaqda Imaanshaha Shaqada.

2.4.2. Qofka shaqaalaha ah ee shaqada ka soo daaha waxaa laga qaadi karaa tallaabo anshax-marin ah oo waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 5aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Anshaxa iyo Wax-ka-qabashada Anshax-xumada.

2.5. Ka-maqnaanshaha Shaqada

2.5.1. Qofka shaqaalaha ah waa in uusan, isaga oo aan fasax cad ka haysan maareeyaha uu hoos tago, saacadaha shaqada xafiiska aan uga tegin wax aan ahayn hawl rasmi ah. Muddo kasta oo uu qofku uga maqnaado shaqadiisa wax aan ahayn hawl rasmi ah waa in lagu qoraa Waraaqda Imaanshaha Shaqada ee qofka shaqaalaha ah ee maalintaa.

2.5.2. Haddii qof shaqaale ah uu shaqada uga maqnaado fasax markaa qofka shaqaalaha ah waa in uu arrintaa ku qoraa Waraaqda Imaanshaha Shaqada ee maalintaas.

2.5.3. Marka qof shaqaale ah uu shaqadiisa ka maqnaado isaga oo aan oggolaansho haysan, muddadaa uu shaqada ka maqan yahay waa in uusan lacagteeda qaadan, waana in uu qofka shaqaalaha ah ku qoraa Waraaqda ImaanshahaShaqada ee maalintaa.

2.5.4. Qofka shaqaalaha ah ee goobta shaqada iyada oo lagu jiro saacadihii shaqada ka maqnaadaa isaga oo aan fasax haysan waxaa laga qaadi karaa tallaabo anshax-marin ah oo waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 5aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Anshaxa iyo Wax-ka-qabashada Anshax-xumada.

2.6. Baxsad (*Abscondment)*

2.6.1. Qoka shaqaalaha ah ee ka maqnaada shaqada oo maareeyaha uu sida tooska ah u hoos tago kula soo xiriirin 6 maalmood oo shaqo oo isku xiga waxaa loo qaadanayaa in uu ka dhuuntey shaqada waxaana Madaxa Waaxda uushaqada ka joojinayaa qofka shaqaalaha ah iyada oo la siinayo kalabar mushaarkiisa inta laga qaadayo tallaabo anshax-marineed oo waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 5aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlada: Anshaxa iyo Wax ka qabashada Anshax-xumada.

2.7. Shaqada ka baxsan saacadaha shaqada ee caadiga ah

2.7.1. Haddii uu qof shaqaale ah shaqeeyo wax ka badan 36 saacadood toddobaad gudihii ama wax ka badan saacadaha ugu yar ee looga baahan yahay bil gudaheed markaa qofkaa shaqaalaha ah:

a) lacag laguma siinayo shaqada dheeraadka ah sida uu dhigayo Xeer-nidaamiyaha 4aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Shaqada ka baxsan saacadaha caadiga ah ee shaqada.

b) xaq uma lahaanayo waqti kale oo loogu mago haddii uusan waafaqsaneyn Xeer-nidaamiyaha 4aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Shaqada ka baxsan saacadaha caadiga ah ee shaqada.

# 3. Ansaxinta Waraaqaha Imaanshaha Shaqada

3.1. Waraaqaha imaanshaha shaqada waa in uu buuxiyaa uuna saxiixa qofka shaqaalaha ah maalinta ugu dambeysa bil kasta waana in uu ansaxiyaa maareeyaha qofkaa shaqaalaha ah. Maareeyaha ayaa ka mas’uul ah hubinta in macluumaadka imaanshaha shaqada ee qofkaa shaqaalaha ah uu sax yahay. Qofka shaqaalaha ah ayaa ay mas’uuliyaddiisu tahay hubinta in macluumaadka ku qoran waraaqdiisa imaanshaha shaqada uu sax yahay iyada oo la raacayo faqradda 3.2.3 ee xeer-nidaamiyahan.

3.2. Waraaqaha imaanshaha shaqada ee la saxiixay waa inQaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay’adeed loogu gudbiyaa hal maalin oo la shaqeeyo gudaheeda ka dib marka ay dhammaato bisha si loo eego xogta qoran ee fasaxyada iyo si looga shaqeeyo mushaar-bixinta.

3.3. Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waa in ay eegtaa xogta qoran ee fasaxyada si loo hubiyo in qofka shaqaalaha ah uu xaq u leeyahay wax fasax ah oo uu u sheeganayo si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 7aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Fasaxyada Xaqa Loo Leeyahay waana in ay cusbooneysiisaa xogta qoran ee fasaxa ee qofka shaqaalaha ah.

3.4. Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waa in ay xisaabisaa oo ay waraaqda imaanshaha shaqada dhammaadkeeda ku qortaa tirada saacadaha uu bishaa ka shaqeeyey boqolleyda ay ka tahay saacadaha qofka shaqaalaha ah looga baahnaa in uu shaqeeyo bisha iyo lacagta halkaa ka soo baxaysa ee qofka shaqaalaha ah uu xaq u leeyahay in la siiyo bishaa si waafaqsan faqradda 3.3.3 ee Xeer-nidaamiyahan.

3.5. Marka uu eego Maareeyaha Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waa in uu saxiixaa Waraaqada Imaanshaha Shaqada ee qof kasta oo shaqaalaha ka mid si uu u ansaxiyo in laga shaqeeyo mushaarka.

# 4. Mushaarka

4.1. Marka la ansaxiyo, Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waxaa ay diyaarineysaa xogta imanshaha shaqaalaha oo kooban ee dhammaan Wasaaradaha iyada oo adeegsaneysa Waraaqda Xogta Kooban ee Mushaarka iyo Imaanshaha Shaqada ee la socota Tilmaanta/Amarka C ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Foomkan waa in lagu lifaaqaa foomka POSA ee la buuxiyey ee mid kasta oo ka mid ah shaqaalaha waana in loo gudbiyaa Wasaaradda Maaliyadda si ay uga shaqeyso mushaar-bixinta.

4.2. Macluumaadka mushaaraadka waa in Wasaaradda Maaliyadda loogu gudbiyaa 3 maalmood oo la shaqeeyo gudahooda ka dib marka ay bishu dhammaato. Waa mas'uuliyadda Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Maaliyadda in ay mushaaraadka uga shaqeyso si waafaqsan macluumaadka ay soo gudbisey Hay'ad kasta oo Loo Shaqeeyo.

4.3. Nuqulka dhammaan Waraaqaha Imaanshaha Shaqada ee asalka ah waa in gal/fayl ay ku haysaa Qaybta Shaqaalaha/Adeegga Hay'adeed ee Hay'adda Loo Shaqeeyo.

4.4. Mushaarka bisha waxaa laga jari karaa lacago ujeedkoodu yahay cashuur, fasax aanu qofka lacag qaadan, ama si looga gooyo lacag ay ku leedahay Hay'adda Loo Shaqeeyo si waafaqsan tilmaamo/amarro uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda.

# 5. Cabashooyinka iyo Rafcaannada

5.1. Qofka shaqaalaha ka tirsan ee aan ku qancin go'aan ay ka qaadatey Hay'adda uu u Shaqeeyo oo la xiriira arrimo ku saabsan shaqaalenimada qofka, ama amar ay siiyeen Maareeye ama Hay'ad Loo Shaqeeyo, waxaa uu Guddiga ka codsan karaa in uu baaro arrintan. Xubnaha Guddiga ayaa dhisaya Guddi Rafcaanno oo madax-bannaan oo eega kiiska oo ka soo bixiya fikir taageeraya Hay'adda Loo Shaqeeyo ama mid taageeraya Qofka Shaqaalaha ah. Haddii ay ku habboon tahay Guddigu waxaa uu cayimayaa tallaabo ay tahay in ay qaaddo Hay'adda Loo Shaqeeyo si ay wax uga qabato cabashada.

## 6. Ansaxinta Xeer-nidaamyaha

6.1. Anniga oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la igu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.



Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya